

Busbus (varicella)

Waa maxay? Busbusku waa cudur aad loo kala qaado oo uu sababo fayras. Calaamadaha busbuska waxay bilaaban doonaan 10-21 maalmood ka dib u bayla noqoshada cudurka. Astaamaha qaar ee cudurka waa:



Nabarro finan ah oo cuncun leh



Waayida rabitaanka cuntada



Dareemista daal badan



Qandho

Sidee ayuu cudurka ku faafaa?



Marka qof busbus qaba uu ku hadlo, ku qufaco, ama ku hindhiso agagaarka dadka kale.



Marka qof kale uu taabto finan ama shay wasakhaysan.

Yaa halis ugu jira inuu aad la xanuunsado?



Dhallaanka



Dhalinyarada iyo dadka waaweyn



Dadka uurka leh



Dadka habdhiska difaaca jirkooda uu daciif yahay

Sideen uga fogaan karaa in aan ku faafiyo dadka kale?



Gacmaha ku dhaq saabuun iyo biyo



Dadka hala wadaagin cuntada, maacuunta, iyo alaabta gaarka ah



Finanka ku dabool dhar



Sagxadaha inta badan la taabto nadiifi



Guriga joog oo ka fogow dadka kale markaad xanuunsan tahay tahay

Tallaal qaadashada waa habka ugu wanaagsan ee looga hortago busbuska.



Carruurta, dhalinyarada, iyo dadka waaweyn waxay u baahan yihiin 2 qiyaasood/doos oo tallaal ah haddii aanay hore tallaal uga qaadan caabuqa.





Bixiyaha daryeelkaaga caafimaad kala hadal wixii ku saabsan tallaalka, haddii aad jiran tahay, ama haddii aad u bayla noqotay busbus. Si aad wax badan uga ogaato booq kingcounty.gov/cd.

Tallaalku wuxuu dadka ka ilaaliyaa busbuska.



Carruurta, dhalinyarada, iyo dadka waaweyn waxay u baahan yihiin 2 qiyaasood oo ah tallaalka busbuska (varicella) ah haddii aanay hore tallaalka uga qaadan caabuqa. Waxaad iska difaacday cudurka haddii uu kugu dhacay cudurka busbuska ama lagu tallaalkay ka hor.

Yay tahay in la tallaalo?

		
Yaa u baahan in la tallaalo?	Dhallaanka iyo socod baradka	Carruurta yaryar
Goorma ay tahay in la tallaalo?	Qiyaasta koowaad: 12-15 bilood	Qiyaasta labaad: 4-6 sano

Maxaan sameeyaa haddii aniga ama ilmahaygu aanu ka difaacnayn busbuska?

Haddii aan waligaa lagu tallaalin ama uusan kugu dhicin cudurka busbuska, kama daahin inaad cudurka ka samaysato difaac! Bixiyaha daryeelkaaga caafimaad kala hadal wixii ku saabsan ka gaarsiinta tallaalka.

		
Yaa u baahan in la tallaalo?	Carruurta 12 sano jirka ah iyo kuwa ka yar	Dadka da'doodu tahay 13 sano iyo kuwa ka weyn
Muddo intee le'eg ayaan sugayaa inta u dhaxaysa qiyaasta #1 iyo qiyaasta #2?	3 bilood	4-8 toddobaad

Yay tahay inaan la siin tallaalka busbuska?



Dadka uurka leh



Dadka laga yaabo inay xasaasiyad ka qabaan tallaalka



Dadka habdhiska difaaca jirkoodu daciif yahay ama qaba jirro aad u daran

Sidee ayay tallaalkada busbuska u badbaado badan yihiin?

Aad ayay badbaado ugu leeyihiin dadka intooda badan. Si la mid ah dawooyinka kale, tallaalkada busbuska waxay yeelan karaan waxyeelooyin. Waxyeellooyinkan inta badan waa kuwo fudud oo iskood u baaba'a. Waxyeellooyinka gaarka ah waxaa ka mid noqon kara:



Xanuun laga dareemo meesha tallaalka laga siiyey qofka



Finan khafiif ah



Qandho



Bixiyaha daryeelkaaga caafimaadka kala hadal qaadashada tallaalka. Booqo kingcounty.gov/findaclinic si aad u hesho xulashooyinka tallaalka qaadashada ee kuu dhow.